



Munaasabadii lagu weyneynayey qaar ka mid ah arday da' yarta madow PPS ee Hibada iyo Xirfdaha u dhasheen

Munaasabadii sanadkii sagaalaad ee ardayda madow ee ilaahay siiyey hibada iyo xirfadaha ayaa waxaa lagu qabtay Xarunta Waxbarashada Degmada BESC. Munaasabadani loogu dabaaldegayo waxa ay diirada saartay 25 arday ee Afrikaanka Maraykan iyo Madowga Afrika Dugsiyada Dadweynaha Portland, kuwaasi oo ka kala socday arday ku jirta xannaanada bilowga ah oo ciyaara ciyaarta golofka iyo tumista durbaanada iyo 11 arday oo ku jira fasalka 12naad oo wax yar u jira in ay noqdaan dad mudakar ah oo ka qalin jabinaya Dugsiyada Sarre.

Waxaa soo buux dhaafiyey qolka shirarka degmada qoysaskii iyo xubno bulshada ka mid ah iyo waliba shaqalaha dugsiyada degmada. Waxa ay dhageysanayeen fariinta soo dhaweynta ee Guddoomiyaha Waxbarashada Guadalupe Guerrero iyo Natasha Butler oo ahayd masuulkii ka hadlayey munaasabada iyada oo noqon doonta Maamulaha Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman ee dhawaan la furi doono.

Carolyn Leonard oo hawl gab ka noqotay maamulka PPS ayaa wareysi ka qaaday ka dibna qortay ku saabsan 25 arday ee buug yaraha munaasabada, qof qof arday ka soo qeybgalayaasha ugu sheegtay, kana sheekeysay sheekoo yinkoodii iyo wixii ay ku guuleysteen, dhibaatooyinkii ay ka soo gudbeen iyo safarka ay u soo mareen.

[Waxaad fiirisaa barnaamij dhammeystiran Ardayda da' yarta Madow ee Hibada Leh 2018.](#)